

COVID-19

Toronto Community Housing



Novel Coronavirus

Abril 1, 2020

Haddii aad u baahan tahay kaalmo, halkaan ayaan joognaa.



Wac 416-981-5500 ama email u dir help@torontohousing.ca waqti kasta si aad ula hadashid wakiilka Daryeelka Macaamilka (Client Care Agent).

Inta uu socdo degdegga COVID-19, shaqaalaha Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) waxay ka shaqeyaan dhismooyinkena iyo xafiisyadana si ay u geeyaan adeegyada muhiimka ah.

Waxaad nagala soo xariiri kartaa Xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre) 24/7:



Haddii aad naftaada go'doomisid una baahan tahay waxyaabaha lagu noolaado maalintii, sida **raashinka iyo daawada**.



Sida loo codsado dayactir. Waxaan ku hawlanahay dayactir degdeg ah, hase ahatee, dhamaan dayactirka aan dedegga ahayn, waxaa loo dhigi doonaa taariikh dambe.



Si aad u qabsatid ballan lana kullantid shaqaalaha inta xafiisyadana ka xeran yahiin dadka iska yimaada.

Shaqaalaha waxay telefoon kula xariiraan waayeelka iyo dagganeyaasha lagu tilmaamo in ay daciif yahiin sidaas darteedna aan weydiisan karin taakuleynta ay u baahan yahiin.



Qeybtena Amaanka Bulshada (Community Safety Unit) waxay shaqeysaa 24/7. Mar kasta, waxaad naga soo wici kartaa **416-921-2323** xagga arrimaha sekuritiga.

Xaqiiqadaha muhiimka ah ee COVID-19

COVID-19 waa fiirus cusub oo la lagu magacaabo "coronavirus." Calaamadaheeda waxaa ka mid ah qandhada, muruq xanuunka iyo daalka, iyo dhibaataada qofka ku qabo neefta. Waxaa kaloo la soo sheegay in ay jiraan dhuun xanuun, madax xanuun iyo shuban.

Haddii aad ku xanuunsatid calaamadaha COVID-19, waa in aad naftaada go'doomisid. La xariir Telehealth Ontario telefoonka **1-866-797-0000** iyo xafiiska bixiyahaada daryeelka aasaasiga.

Sida qofka naftiisa u go'doomiyo



Joog guriga. Ha tagin shaqo, dugsi ama meelaha dadweynaha ka dhexeeyo. Ha isticmaalin gaadiidka dadweynaha.



Yareey dadka kugu soo booqda gurigaada. Ha kuu yimaadaan marti ay qasab kugu tahay in aad aragtid keliya adiga oo gaabiya booqashada. Ka fogow waayeelka iyo dadka siistemyadooda difaaca qariban yahay.



Iska ilaali in aad ku dhawaatid dadka kale. Joog qol gaar ah oo ka fog dadka kale. Isticmaal musqul gaar ah haddii ay suurtoagal tahay. In badan ka dil jeermiga meelaha dadka ka dhexeeyo iyo qolalka la qeybsado. Fur dariishadaha si aad u hagaajisid socodka hawada. Ka fogow dadka ugu yaraan labo mitir (lex cag).

Ogeysiiska caafimaadka dadweynaha in qofka go'doomiyo naftiisa

Caafimaadka Dadweynaha Toronto (Toronto Public Health) waxay kula tallisaa qof kasta oo ka soo noqda safar dibadda ka ah Canada laga bilaabo Maarso 2, 2020 in uu naftiisa go'doomiyo muddo 14 maalin.

Soo sheegidda qofka naftiisa go'doomiyo

Haddii aad naftaada go'doomisid, fadlan ogeysii Xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre), telefoonka **416-981-5500** ama **help@torontohousing.ca**. Tan waxay noo ogolaan doontaa in aan talaabo ku habboon ka qaadno ammaanka iyo in aan kugu xerno taakuleynta aad u baahan tahay.

In aad naftaada ka badbaadisid cudurka

Saraakiisha caafimaadka dadweynaha waxay ku talliyaan in aad in badan gacmahaada ku dhaqidid saabuun iyo biyo ugu yaraan 15 sekan si aad isaga ilaalisid cudurka. Dhaqidida gacmaha waxay la mid tahay waxyaabaha yareeya cudurada soo gaara gacmaha, kuwaasoo ku yar magaalada oo idil.

Talaabadaha ka fogaashada dadka

Ka fogaashada dadka, loo yaqaan ka fogaashada bulshada, waxaa loola jeedaa iska ilaalinta xariirka sokke ee lala yeesho dadka kale si loo hakkiyo faafidda COVID-19.

Sida ugu fiican aan dhamaan wax ku biirin karno caafimaadkena, kana hortagi karno faafidda COVID-19 waxay tahay in aan joogno guriga kuna celcelino ka fogaashada dadka. Ka fogaashada waxaa loola jeedaa in aad:

- Ku shaqeysid guriga, haddii aad awoodid
- In aad joogtid guriga marka laga reebo in aad u baxdid danno aad u baahan tahay
- Naftaada go'doomisid haddii aad ka weyn tahay 70 sanno ama haddii uu qariban yahay siistemkaada difaaca
- Dadka ka fogaatid labo mitir (lex cag), mar kasta ay suurto gal tahay
- Joojisid ama dib u dhigtid in aad la kullantid in ka badan shan qof si loo taageero jawaabta laga bixiyo caafimaadka dadweynaha, TCHC waxay qaaday talaabooyin la xariira ka fogaashada dadka ilaa laga soo saaro ogeysiis dheeraad.

- Dhamaan xafiisyada TCHC waa ka xeran yahiin dadka ku yimaada ballan la'aan.
- Waa la xeray dhamaan meelaha lagu nasto iyo qolalka bulshada ee ku yaala dhismooyinkena, marka laga reebo miisaska raashinka laga qaato iyo brograamyada kale ee la xariira raashinka ay maamulaan wakaaladaha.
- Waa la joojiyay doorashooyinka dagganaha iyo dhamaan hawlaha la xariira
- Waa la joojiyay shirarka dadweynaha iyo kullamada wargelinta dagganaha Gadaal ayaa loo dhigay dhamaan dhismaha ka socdo guriga dhexdiisa iyo codsiyada dayactirka aan degdegga ahayn
- Waa la xeray goobaha lagu cayaaro iyo meelaha lagu nasto ee ku yaal dibadda

Haddii aad dooneysid hagaajin dedeg ah, wac Xarunta Daryeelka Macaamilka (Client Care Centre). Iibiyeyaasha loo soo diro in ay wax ka hagaajiyaan gurigaada waxay labbisnaan doonaan qalabka badbaadinta qofka.

Ma ka walwalsan tahay bixinta kharashka kirada?



Guryaha Bulshada Toronto (Toronto Community Housing) waxay u fududeysay dagganeyaasha lumiyay dakhliga shaqada taasoo ugu wacan COVID-19.

Kirada-ku-saleysan-dakhliga (RGI) iyo dagganeyaasha bixiya kirada suuqa waa in ay keenaan warqado caddeeya dakhliga ka lumay. Waan kula shaqeyn doonaa haddii aadan haysanin warqado hase ahatee waxaa loo baahan yahay in aad keentid warqadaha goor dambe.

Reeraha kiradooda ku saleysan tahay dakhliga (RGI), TCHC waxay dib u xisaabin doontaa kirada taasoo ku saleysan dakhliga shaqada ee ka lumay. Reeraha bixiya kirada suuqa, TCHC waxay siisaa fursad in ay gadaal u dhigaan bixinta qeyb ka tirsan kirada.

Dagganeyaasha aan luminin dakhliga shaqada waa in ay si buuxdo u bixiyaan kiradooda.


Isbaddalada muhiimka ah inta uu socdo degdegga COVID-19


TCHC ma ogola dadka yimaada xafiisyadeeda si ay u bixiyaan kirada. Dagganeyaasha waxay kirada ku ridi karaan sanduuqa ku yaal xafiiska Maamulaha ama waxay u diri karaan xafiiska xaafadda Qeybta Hawlaha (Operating Unit) iyagoo ku soo dira boostada, bangiga internetka ama bangiga telefoonka, ama lacag bixinta horay lagu heshiyay (pre-authorized payment).


Wakaaladda Dakhliga Canada (Canada Revenue Agency) waxay gadaal u dhigtay taariikhda kama dambaysta ee la soo gudbiyo canshuur celinta dakhliga iyo manaafacaadka. Taariikhda kama dambaysta ee cusub waa Juun 1, 2020.

Magaalada Toronto (City of Toronto) waxay gadaal u dhigtay, ilaa laga soo saaro ogeysiis dambe, isbaddalada la qorsheyay ee lagu xisaabo kirada-ku-saleysan-dakhliga ee ka dooni lahaa dagganeyaasha in ay haystaan Ogeysiiska Qiimeynta 2019 (2019 Notice of Assessment) lana xariira dib u fiirinta kirada sannadka xiga, bisha Luulyo 1, 2020 kaddib.


Talaabado dheeraad ah

 Nadiifinta iyo dillidda jeermiga, saddax jeer maalintii, todobada maalin halkii todobaad

 Saacadaha fidsan ee ka jira dhismooyinkena: 8 a.m. ilaa 6 p.m., todobada maalin halkii todobaad

 Ogeysiisyada: “Dib u dhigo tagidda” meelaha laga soo galo dhismaha iyo “Baarista 20ka-sekan” ee ka jira xafiisyada

Brograamka baddalaadda AC

 Si aan u habsano in dhamaan dagganeyaasha laga baddalo konditionarka hawada ka hor inta aan la gaarin cimilada kulul, waxaan sii wadnaa brograamka isdhaafsiga konditionarka hawada anaga oo si buuxdo uga taxadirno ammaanka. Dagganeyaasha waxay dooran karaan in aysan waqtigaan ku dhaqaaqin isdhaafsiga. Bacdamaa xaaladda COVID-19 isbadbaddasho, waxaan habbeyn doonaa brograamka hadba sida loogu baahdo si aan u badbaadino caafimaadka iyo ammaanka dagganeyaasha.

Xogogaal noqo

- Bogga internetka Magaalada Toronto: toronto.ca/covid-19
- Bogga internetka TCHC ee u xil saaran: torontohousing.ca/covid-19
- La soco bostarada lagu dhajiyo dhismahena iyo warqadaha aan ku soo dirno boostada



Ma rabtaa in email laguugu soo diro wararkii ugu dambeyay COVID-19?



Wac **416-981-5500** si qoraalkaan laguugu siiyo luqad kale ama qaab kale.